# *JAMHUURIYADDA SOMALILAND*

## GOLAHA WAKIILADA

**XEERKA MAAMUUSKA MADAXWEYNAHA, MADAXWEYNE KU XIGEENKA HORE IYO MUDANAYAASHA BAARLAMAANKA**

**XEER Lr. 62/2013**

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

REF. JSL/M/XERM/249-2071/092013 DATE 28/09/13

# XEER MADAXWEYNE Lr: 0362/092013

## Dhaqan-galka Wax Ka-Beddelka Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne Ku-xigeenka Hore iyo Mudanayaasha Baarlamaanka Xeer Lr. 62/2013

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada JSL, Go'aan Lr. GW/G/KF-22/618/2013 ee ku taariikhaysan 10/09/2013 ee ay ku ansixiyeen Wax Ka-beddelka Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne Ku-xigeenka Hore iyo Mudanayaasha Baarlamaanka Xeer Lr. 62/2013.

Wuxuu Soo Saaray

Dhaqan-galka Wax Ka-beddelka Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne Ku-xigeenka Hore iyo Mudanayaasha Baarlamaanka Xeer Lr. 62/2013.

Allaa Mahad Leh,

REPUBLIC OF SOMALILAND President

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

RECEIVED RL: 52 30/09/2013

Ref: GW/G/KF-22/618/2013 Date : 10/09/2013

**Go'aanka Ansixinta Soo-Jeedinta Wax-ka-Bedelka Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, M/weyne ku-xigeenka hore iyo Mudanayaasha Baarlamaanka Xeer lr/62/2013**

**Markuu Arkay: -** Qodobka **37aad, 38aad** Faqradii **1aad**, Qodobka **47aad, 65aad, 79aad** iyo Qodobka **87aad** ee Dastuurka JSL.

**Markuu ogaaday:-** Kaalinta wax ku-oolka ah ee Madaxweynayaashii, Madaxweyne ku xigeenadii hore iyo Mudanayaasha Baarlamaanku ka qaataan dhismaha Qaranka JSL

**Markuu Tixgaliyay:-** Soo jeedinta wax-ka-badalka Madaxweynaha ee Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka iyo Mudanayaasha Barlamaanka ee tixraaciisu yahay JSL/M/SHG/081-1918/072013 kuna taariikheysan 22/07/2013.

**Markuu u Codeeyay:-** Ansixinta wax ka badalka Madaxweynaha ee Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka hore iyo Mudanayaasha Barlamaanka **Fadhigii 9aad ee Kal-fadhiga 22aad** taariikhduna aheyd **02/09/2013** oo ay goob joog ahaayeen **(42)** Mudane oo ka mida ah mudanayaasha Golaha Wakiilada.

## WUXUU

Cod aqlabiyad ah **(32 cod)** oo gacan taag ah ku ansixiyay wax ka badalka Madaxweynaha ee Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, M/weyne ku-xigeenka hore iyo Mudanayaasha Baarlamaanka ee (Xeer **No. 62/2012)**, halka ay ka diideen **(5)** Mudane, kana aamuseen **(4)** Mudane, **Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caadada ah.

**ALLAA MAHAD LEH**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL

**C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)**
Gudoomiyahah Golaha Wakiilada JSL

GOLAHA WAKIILADA
JAMHUURIYADA SOMALILAND

# GOLAHA WAKIILADA JSL

**Markuu Arkay: -** Qodobka **38aad** Faqradii **1aad**, Qodobka **47aad, 65aad, 79aad** iyo Qodobka **87aad** ee Dastuurka JSL.

**Marku tixgeliyay:-** Soo jeedintii Madaxweynaha ee sumaddeedu ahayd JSL.M/XGW/007/2012 ee ku taariikhaysnayd 26/07/2012.

**Markuu ogaaday:-** Kaalinta wax ku-oolka ah ee Madaxweynayaashii, Madaxweyne ku xigeenadii hore iyo Mudanayaasha Baarlamaanku ka qaataan dhismaha Qaranka JSL

## Wuxuu Soo Saaray

Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne ku-Xigeenka hore iyo Mudanayaasha Baarlamaanka (Xeer Lr.62/2013)

## Qodobka 1aad
## Magaca Xeerka.

Xeerkan waxa loogu yeedhaa Xeerka Maamuuska Madxweynaha iyo Madxweyne ku-xigeenkii hore iyo Mudanayaasha baarlamaanka JSL.

## Qodobka 2aad
## Erey Bixinta.

**Xeer-dejinta (Baarlamaan):-** waxa loola jeedaa Baarlamaanka JSL oo ka kooban labada aqal ee kala ah (Golaha Guurtida iyo Golaha Wakiilada)
.

**Mudane:-** waxaa loo jeedaa xubin ka tirsan Golaha Guurtida ama Golaha Wakiilada jsl.

**Gunno-Sagootis:-** waxa loola jeedaa qadar lacageed oo la siiyo Mudanaha Baarlamaanka ee dhamaystay muddo Xilleedkiisa Dastuuriga ah.

**Gunno Maamuus:-** waxa loola jeeda qadarka lacagta ah ee la siinayo madaxweyneyaashii iyo Madaxweyne ku-xigeenadii hore.

**Madaxwayneha hore:-** Qofkastoo xillka madaxwayne ka qabtay Somaliland intay jirtay.

**Madaxweyne ku xigeen hore:-** Qofkastoo xillka Madaxwayne ku-xigeen ka qabtay Somaliland intay jirtay.

## Qodobka 3aad
## Dhawrsanaanta

Madaxweynaha iyo Madaxwayne ku-xigeenka hore waxay leeyihiin dhawrsananta sharci ee ay leeyihin mudanayaasha baarlamaanka, waxaana uu ku waayi karaa haddii maxkamad ay ku rido xukun kama danbays ah oo ciqaabtiisu aanay ka yarayn saddex (3) sanadood.

## Qodobka 4aad
## Xuquuqda Hoyga

Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore waxay xaq u leeyihiin:

1. In dawladdu siiso hoy ku habboon oo ah guri dawladeed isla markaana ah kiro bilaash ah (free rent) inta ay nool-yihiin iyaga iyo xaasaskoodu ama ka ugu yar caruurtu uu ka gaadhayo 18 jir.

2. In ay dawladdu u dayac tirto hoyga iyadoo la raacayo nidaamka dayactirka guryaha dawladda.
.
3. Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hela Xuquuqda ku xusan Faqrad 1aad ee Qodobkan ma iibinkaraan, cidkalena laguma wareejin karo, loomana iscticmaalikaro sifo sharci-daro ah.

4. In la siiyo hal gaadhi, dareewal, Laba shaqaale, 3 ciidan ah oo ilaaliya nabadgalyadooda iyaga iyo guryahoodaba kuwaas oo kharashkooda dawladu bixinayso.

## Qodobka 5aad
## Gunnada Maamuuska madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore.

1. Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore waxay leeyihiin 25% mushaharka ku xusan xeerka mushaharka Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka iyo xuquuqda ay ku helaan xubin sharafeednimada Golaha Guurtida.

2. Haddii Madaxweynaha ama Madaxweyne ku-xigeenka hore geeri ku timaado marwadiisa ama marwooyinkiisa iyo caruurtiisu waxay leeyihiin 12.5% mushaharka ku xusan Xeerka madaxwaynaha iyo madaxwayne ku xigeenka.

3. Haddii marwada ama marwooyinka madaxweynayaasha ama Madaxwayne ku-xigeenada hore ay geeriyi ku timaado waxaa caruurta loo sii wadayaa 12.5% mushaharka ku xusan madaxweynaha iyo madaxweyne ku-xigeenka ilaa inta ilmaha ugu yari ka gaadhayo 18 sano jir.

**Qodobka 6aad**
**Xilliga bilowga Gunnada**

1. Waxa Madaxweynaha ama Madaxweyne ku-xigeenka hore gunnada looga bilaabaya marka ay xillka wareejiyaan.
2. Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore ee intaan Xeerkani dhaqan galin xillka ka degay waxa Gunnada looga bilabayaa ka dib marka uu Xeerkani dhaqan galo.

**Qodobka 7aad**
**Kharashka caafimaadka**

Haddii madaxweynaha ama Madaxweyne ku-xigeenka hore ay soo food saarto xaalad caafimaad daro oo gudidda dhakhatiirta Qaranku ku taliyaan in cusbitaal dibadeed loo diro, waxaa kharashka caafimaad bixinaya xukuumadda.

**Qodobka 8aad**
**Reebanaanta**

Xuquuqda u Xeerkani jideeyey waxa ka reeban in la siiyo Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore ee xillka lagaga qaaday maamus ka xayuubinta Dastuuri ah.

**Qodobka 9aad**
**Geeridda Madaxweynaha ama Madaxweyne ku-xigeenka hore**

Marka ay geeri ku timaado Madaxweynaha ama Madaxweyne ku-xigeenka hore, waxaa loo samaynayaa aas Qaran.

## Qodobka 10aad
## Hab-Maamuuska Mudaneyaasha Baarlamaanka

1. Mudanayaasha Baarlamaanka looma diidi karo gelida xafiisyada dawladda iyo meel kasta oo ay shaqo qaran ka socoto marka ay gudanayaan xilkooda iyo waajibadkooda dastuuriga ah.
2. Waa waajib in hay'addaha iyo Wasaraddaha Qaranku siiyaan xog-ramsi ah oo run ah Gudi-hosaadyadda Golayaasha iyo Mudanayaasha loo igmado xill-gudasho.
3. Cid kasta oo ka hortimaado xeerkan ama meel kaga dhacda sharafta mudane ama xayirta xilka uu gudanaayo waxaa lagu ciqaabayaa si waafaqsan Xeerka Ciqaabta Guud ee ah dambiyada laga galo hawl-wadeen Qaran.
4. Waxaa waajib ku ah dhamaan shaqaalaha Dawladda, Ciidamadda Qaranka iyo cidii kale ee hawl qaran looga baahdo inay u fududeeyaan gudashada xilkooda.

## Qodobka 11aad
## Gunno Sagootis ee Mudanayaasha Baarlamaanka

**1.** Mudanayaasha Baarlamaanka ee dhamaysta muddo xilleedkooda Dastuuriga ah waxa la siinayaa gunno sagootis ah oo dhan hal Sanno mushaharkeed.

**2.** Gunnada ku xusan faqrada 1aad ee Qodobkan waxaa xaq u yeelanaya mudanayaasha baarlamaanka ee muddo xilleedkoodu socdo iyo kuwa ka dambeeya.

**3.** Gunnada ku xusan faqrada 1aad ee Qodobkan Wasaaradda maaliyadu waa inay ku bixisaa saddex bilood gudahood marka lagu dhawaaqo natiijada doorashada baarlamaanka cusub.

## Qodobka 12aad
## Daryeelka Caafimaadka Mudanyaasha Baarlamaanka

Mudanayaasha Baarlamaanku waxay xaq u leeyihiin inay helaan xanaano caafimaad oo la mid ah ta ku xusan Qodobka 7aad ee Xeerkan.

## Qodobka 13aad
## Adeegsiga Xeerka

Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenadda hore iyo Mudanayaasha baarlamaanka ee maanta fadhiya iyo kuwa ka danbeeya.

## Qodobka 14aad
## Tir-tiridda

Waxaa la tir-tiray Xeerkasta ama Qodobkasta oo ka hor imanayaa xeerkan, laguna jideeyey xuquuqda Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore iyo Mudanayaasha Baarlamaanka.

## Qodobka 15aad
## Dhaqan-galka

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka labada Gole ee Xeer dejintu ansixiyaan madaxweynuhuna saxeexo.

| | |
|---|---|
| C/risaaq Siciid Ayaanle | C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro) |
| Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL | Gudoomiyahah Golaha Wakiilada JSL |